Ku soo-dhawaada degmada Umeåregionen

FAAFIN LOO MADAX BANNAAN YAHAY
– WARBIXIN LOOGU TALOGALAY MAGANGELYODOONKA

Bjurholm | Nordmaling | Robertsfors | Vindeln | Vännäs | Umeå

victoria

Kanu waa gobolka Umeå

Gobolka Umeå juquraafi ahaan iyo iskaashi ahaanba wuxuu ka kooban yahay degmooyinka kala ah Umeå, Bjurholm, Nordmaling, Robertsfors, Vindeln iyo Vännäs. Degmooyinka waxaa isku xira isbaheysi dabiici ah iyo wadashaqeyn xaga wanaajinta nolosha iyo adeegga bulsho, balse sidoo kale horumarinta shirkadaha iyo kobcinta dhaqaalaha.

Wadashaqeyntu waxay keentay in degmooyinka hawlkarnimadoodu korodho iyo in manaafacaadka guud hab wanaagsan loo isticmaalo. Waxa sidoo kale kordhaya awoodda isticmaalka dhaqaale, oo degmooyinka si wada jir ah ayay ku bixin karaan adeeg bulsho uga qiime jaban haddii ay midmid ku bixin lahaayeen.

Gobolka Umeå sidoo kale waa mid ka mid ah gobollada ugu kobcidda badan. Halkan waxaa ka jira laba jaamacadood, shirkado firfircoon iyo nololdhaqameed taajir ah. Iskaashiga iyo isweydaarsiga fikradaha degmooyinka waxay fursado horumar wanaagsan siiyaan dadka iyo shirkadahaba.

WAXYAABAHAN AYAAD KA HELI KARTAA QAABILAADDA QAXOOTIGA GOBOLKA UMEÅ

- Gacanhaye qaxooti ku qaabila oo ku siiya macluumaad ku saabsan bulshada
- Ugu yaraan 15 saacadood toddobaadkiiba ee barasho af Iswiidhish
- Tabobar shaqo
- Lix toddobaad gudahooda in lagugu xiriiriyo Xaafiiska Shaqada
- Taageero iskugeynta qoysaska kala maqan
- Qof talooyin kaa siiya habka aad shaqada ku raadsan lahayd
- Fursado aad isbaheysiyada waxbarashada iyo hay'adaha samafalka ah aad uga hesho waxaad qabato waqtiyada firaaqada aad leedahay

WAXYAABAHAAN AYAAN KAA FILANAYNAA

- Inaad waqti buuxa uga qaybqaadato barnaamijka soodhaweynta, 40 saacadood toddobaadkiiba, haddii ay jiraan wax la qabto waqti buuxa
- Inaad si firfircoon uga qaybgasho barnaamijyada aad isla qorsheysaan adiga iyo gacanhayahaaga qaxooti, midka shaqo iyo qolyaha kale ee aad ku xiran tahay muddada uu kuu socdo barnaamijka soodhaweynta
- Inaad xoogga saarto tabtii aad si dhaqso leh ugu gaari lahayd heer aad iskaa isku masruufto
- Inaad Iswiidhishka ka barato degmo kasta ee ku taal gobolka Umeå ee laga helo waxbarasho waafaqsan aqoontaada hore



Ku soo-dhawaada degmada Bjurholm

Degmada Bjurholm waa degmada dalka Iswiidan ugu yar, waxaana qiyaastii ku nool 2 600 qof, dhulkeeduna qiyastii waa 1 374 km oo labo jibbaar ah. Waa goob wax kasto aanan ka fogeyn, ummadda ku nool-na wey ka helaan degmadooda. Degmada waxay kaloo leedahay tirada dambifalka dalka ugu hoseeyo iyo qiimaha kirada aqalka dalka ugu hoseeyo, waana degmada ugu macallin badan haddii la barbardhigo tirada dadka ku nool.

HOYGA

Degmada Bjurholm waxay leedahay fursado waawayn oo lagu xusho hoy. Waxaa la heli karaa kuwa aqallada dabakh ah iyo fillooyinka cusayb ama qadiimi ah, kuwaaso lagu heli karo qiimo jaban, kuna yaalan miyiga ama goob aqallada ku badan yihiin.

ADEEGGA BULSHADA

Goobaha laga adeegsado iyo xaafadaha degmada Bjurholm way isku dhow yihiin. Waxaa ku yaalo dukaammo lagu iibiyo raashinka, dharka, kabaha iwm. Waxaa kaloo laga hela rugta buugagga, goobaha lagu qubeeysto, goobaha isboortiga, boostada, bangiyada iyo dukaamda loo yaqaanno “närköp”. Teeda kale waxaa laga hela rugta daryeelka caafimaadka oo takhtar joogo, kalkaalisda caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka ilkaha.

XANNAANADDA CARRUURTA IYO DUGSIYADA

Degmada waxaa laga helaa dugsiyada biloowga, hoose iyo dhexe [låg- mellan- och högstadium]. Waxaa kaloo laga hela dhaqdhaqaaqyada xilliyada fasaxa ah, kuwaaso loogu talagggalay carruurta dugsiyada dhigata. Teeda kale, waxaa la heli kara goobaha carruurta lagu xannaanadeeyo oo wanaagsan, kuwaaso ka kooban [förskoleavdelningar] iyo [privata dagbarnvårdare].

WAXBARASHADA

Degmada Bjurholm waxaad ku haysataa fursad aad dugsiga [Castorskolan] ku barato luqada iswiidishka. Dugsiga da’weynta [KomVux] wuxuu ku yaala degmada Vännäs oo qiyaasti 30 km dhanka konfureed ka jirta. Jaamacadda magaalada Umeå waxay ku taala goob aan fogeyn.

GANACSIGA IYO SUUQA SHAQADA

Ganacsiga degmada Bjurholm wuxuu ka kooban yahay laammo aad u kala duwan, kuwaaso u dhaxeeyo shirkado yaryar ilaa kuwa waawayn, sida warshadaha casriga ee adeegsado farsmada heerka sare ah. Adeegga ganacasiga wuxuu aad muhim ugu yahay degmada. Shirkadaha degmada waxay caan ku yihiin warshadada beeraha, kaaynka, mekaanikada iyo blaastikada. Maadaama Degmada Bjurholm aynan sidaas u waynayn, ayaa hab dhaqsi oo fudud go’aamada arrimaha laga gaara oona loo hirgeliyaa.

DHAQAMADA IYO XILLIYADA FASAXA AH

Dadka xiseeyaa isboortiga iwm waxay degmada ka heli karaan fursado badan oo arrimahaas ku saasban. Goob 2 km bartamaha degmada Bjurholm u jirtaa waxaa ku yaalo meel lagu ciyaaro ciyaarta [Golf] oo ah nooca [18-hål]. Teeda kale, waxaa laga hela meel lagu ciyaaro ciyaraha barafka xilliyada qaboowga, iyo orodka xilliyada kuleelaha. Goob [Rågbergets slalom-backar] lagu ciyaaro ciyaaraha qabowga ayaa laga hela goob bartamaha magaalada u jirta 10 km. Xilliga kuleelaha waxaa la adeegsan karaa doon yar durdurka Öreälven. Degmada waxaa laga hela goobo qurux badan ku fiican socsocodka, fardaha lagu wado iyo lagu kalluumeeysto. Ururro tiro badan ayaa degmada Bjurholm ka furan, kuwaaso ka mid ah kuwa isboortiga, muusikada iyo dhaqamada. Waxaa kaloo laga hela gobaabinta waxbarashada, kuwaaso waxyaale badan oo kala duwan lagu barto.

IS-GAARSIINTA

Baasaka magaalada Umeå taga way wanaagsan yihiin, dhowr baas ayaa maalin kastaa degmada ka taga. Degmada waxay magaalada Umeå u jirtaa 60 km, waxaan loo socda qiyaastii 60 daqiiqo. Magaalada Umeå waxaa ku yaal garoonka diyaaradaha, degmada Vännäs, waxaa loo socda 30 daqiiqo, waxaa la hela isteeshanaka tareenada.

Warbixin faahfaahsan kala xiriir:
Isku dubarideha arrimaha qaxootida
Elisabeth Nordlund
Tal 0932-140 75, 070-408 71 40
Boostada elektroonikada: elisabeth.nordlund@bjurholm.se
Bogga Internetka: www.bjurholm.se

Ku soo-dhawaada degmada Nordmaling



Degmada Nordmaling waxay ku taallaa goob wanaagsan, aanan ka fogeyn xeebta. Degmada waxaa laga helaa adeegyada bulshada, goobo xiiso leh oo jimicsiga loogu talagalay. Teeda kale waa deegaan xasilan oo ammaan leh. Degmooyinka leh goobaha dhaqamada iyo suuqyada waawayn degmada kama foga. Maxeeyeelay, degmada Nordmaling waxay ku taala goob u dhaxayso magaalooyinka Umeå iyo Örnsköldsvik – qiyaastii 50 km ay midkiiba u jirtaa. Degmada Nordmaling waxaa qiyaastii ku nool 7 400 qof.

GANACSIGA IYO SUUQA SHAQADA

Degmada Nordmaling waxay leedahay dhaqamo warshadeed aad u culus. Ganacsiga degmada wuxuu waayahan danbe ka kooban yahay shirkado yaryar, iyo kuwo waayayn an tiradooda sidaas u badnayn, kuwaasoo kamid ah Olofsfors arrin-baareha, Masonite iyo Pumpex. Xitaa degmada Nordmaling waxay shaqaysiisa dadyoow tiro badan, kuwwao gaar ahaan ka shaqeeya laamaha daryeelka iyo xannaanadda.

WAXBARAHADA

Dugsiga Artedi [Artediskolan] waxaa ku baran karta luqada iswiidishka loogu talaggala soo-galeetigay [SFI], da'waynta waxay ka dhigan karaan [grundvux]. Waxaa kaloo degmada laga helaa ururrada waxbarashada [Vuxenskolan] iyo ABF.

IS-GAARSIINTA

Maadaama degmada ay ku taalo goob u dhaxeeyso magaalada Umeå iyo Örnsköldsvik, wuxuu qofku heli karaa fursad oo kaga dhoofo laba garoon oo u jirta isku masaafo. Sidaas awgeed, adduunwaynaha kama foga. Gaadiidka baaska oo maalinlaha ah oo mara xeebta norrland [norrlandskusten], kaaso ku hakada degmooyinka yaryar wuxuu saamayn wanaagansan ku yeesha is-gaarsiinta degamada. Waxaa imminka socda dhismaha [Botniabanan] oo ah waddada tareenka, taaso sare u sii qaadi doonto heerka is-gaarsiinta wanaagsan. Markii dhismahu u dhamaado waxaa labada magaallo oo waawayn loo socon doona qiaastii 20 daqiiqo.

ADEEGGA BULSHADA

Degmada Nordmaling waxaad ka heleysaa wax kasto oo bulshada u baahan. Waxaa ku yaalaaan dukaammo lagu iibiyo raashinka, bangi iyo boosto, dhowr dukaammo iyo makhaayado.

XANNAANADDA CARRUURTA IYO DUGSIYADA

Degmada Nordmaling waxaa laga helaa dugsiyada gogoldhigga [förskola] iyo dugsiga biloowga, hoose iyo dhexe [grundskola], kuwaaso loogu talaggalay dhammaan carruurta degamada ku nol. Goobaha carruurta lagu xannaaneeyo iyo dugsiyada way wanaagsan yihiin. Waalidiinta uma baahna in ay ka welwelaan carruurtooda maadama shaqaale xirfad leh oo daacad ah carruurtooda gacanta ku haayo.

DHAQAMADA IYO XILLIYADA FASAXA AH

Degamada waxay leedahay deegaan qurux badan. Agagaarka degmada waxaa ku yaallo kayn, webi iyo bad. Degamda waxay leedahay goobo socsocodka ku habboon ee webiyo laga kalluumeeysto.
Dadka xiseeyaa isboortiga, waxay degmada ka heli karaan fursado badan oo arrimahaas ku saasban. Goobaha ciyaaraha barafka kala duwan [ishall] iyo [slalombacke], goobaha isboortiga iyo lagu dabaasho. Ururro tiro badan ayaa degmada ka furan, kuwaaso ka mid ah kuwa leh goob wakhti-lummis ah, taaso degmada ugu gacan-sareeyso. Kuwaaso ka mid ah kuwa fardaha [ridning], toogashada [skytte], kalluumeeysashada, isboortiga iyo dhaqamada. Dadweynaha dhamaantood waxay lee yihiin fursad ay ku biiran ama ku aasaasan urur.

HOYGA

Degmada Nordmaling waxay leedahay fursad lagu noolaado deegaan wanaagsan. Aqalada degmada waa heer sare, dadweynaha badidooda-na waxay ku nool yihiin aqallo iyaga u gaar ah, laakinse waxaa laga helaa kuwa dabakh ah.
Kuwaaso ku yaalan bulshada iyo tulooyinka degmada Nordmaling agagaarkeeda ku yaalaan.

Warbixin faahfaahsan kala xiriir:
Isku dubarideha arrimaha qaxootida
Dali Eriksson
Tal: 0930-143 33, 070-263 96 22
E-post: dali.eriksson@nordmaling.se
Bogga Internetka: www.nordmaling.se

Ku soo-dhawaada degmada Robertsfors

Degmada Robertsfors waxay ku taala goob u dhaxayso magaalooyinka Umeå iyo Skellefteå. Waxaa ku nool dad tiradooda qiyaastii gaarayso 7 000 qof. Waa degmo aanan sidaas u waynayn, oo ay ku nool yihiin qoysas carruur leh iyo keli-nooleyaal, ka-na hela degmada. Waa degmo dadweynaheeda – da'yar iyo da'weyn ba – ay hab fudud saxiibo ku yeeshaan. Wakhtiyada fasaxa-na, qofku wuxuu heli karaa wakhti-lummis badan. Dugsiyada iyo dukaamanka kama foga degmada Robertsfors. Hab fudud ayaa baasaska lagu tegi karaa magalooyinka waawayn, shaqo, waxbarasho ama booqasho awgood.

HOYGA

Dadweynaha ku nool degmada Robertsfors waxay badidooda ku nool yihiin aqallo iyaga u gaar ah, laakinse waxaa laga helaa kuwa dabakh ah. Kuwaaso ku yaalan bulshada iyo tulooyinka degmada agagaarkeeda ku yaalaan.

IS-GAARSIINTA

Hab fudud ayaa baas lagu tegi karaa magaalada Umeå. Baasaska waxay dhaqaaqan laga bilaawo aroortii ilaa saacadaha danbe ee fiidkii. Waxaa loo socdaa qiyaastii 50 daqiiqo. Baasaska badidooda waxay ku hakadaan jaamacadda Umeå iyo isbitaal-gobleedka Umeå, maxaayeelay dad tiro badan ayaa wax ka barto ama ka shaqeeya. Dad badan ku nool degmada Robertsfors ayaa isku gaari gaadid ka dhigta markii ay shaqo ama dugsiga tagayaan. Baasaska dhammaantood oo taga magaalada Umeå waxay istaagaan isteeshanka tareenka, halkaas hab fudud loogu gudbi karo garoonka dayuuradaha. Dayuurada ka soo dhoofta magaalda Umeå hal sac ayee ku timaada magaalada Stockholm.

XANNAANADDA CARRUURTA IYO DUGSIYADA

Degmada Robertsfors waxaa ku yaala 5 dugsiyo oo ah biloowga, hoose iyo dhexe [grundskola]. 1 dugsi sare iyo 8 dugsi oo ah kuwa gogoldhigga. Xannaanada carruurta iyo dugsiyada waa goobo amaankooda wanaagsan yihiin oo carruurta u roon. Da'weynta waxay baran karaan af iswiidishka ama dhigan karaan dugsiga da'weynta [komvux]. Ardayda dhigata dugsiyada sare waxay kireeysan karaan kombyuutar, kaaso aqalka u qaadan karaan. Degmada waxaa ku yaalo dugsiyada lagu barto baabuur-wadida, ama baran karaan xirfada makhaayadaha, hoteelada ama daryeelka waayeelka iyo bukaanada.

GANACSIGA IYO SUUQA SHAQADA

Degmada Robertsfors waxaa ku yaalo warshado tiro badan, sida kuwa elektroonikada, [ytbehand-ling], [gjuteri] iyo [verktygsindustri], warshadaha ugu waawayn waxay soo saaraan [industridiamanter]. Dadweynaha ku nool degmada waxay badidooda ka shaqeeyaan warshadahaas, dugsiyada ama daryeelka caafimaadka.

ADEEGGA BULSHADA

Goobaha laga adeegsado iyo xaafadaha degmada way isku dhow yihiin. Waxaa ku yaalaaan dukaammo lagu iibiyo raashinka, dharka, go'yaha, kabaha iyo ha-diyadaha. Waxaa kalo laga hela bangiyada, daryeelka caafimaadka ilkaha, rugta daryeelka caafimaadka, xafiiska shaqada iyo farmashiiyo.

DHAQAMADA IYO XILLIYADA FASAXA AH

Xilliga fasaxa waxaa lagu dabaalan karaa goobta lagu dabasho ama ciyaaraha barafka [åka skidor] ama [skridskor]. Waxaa laga hela ururrada isboortiga oo tiro badan oo kala duwan, sida kuwa kubbada cagta [Fotboll], kubbada gacanta [handboll], [ishockey] ama aqalka fardaha. Waxaad booqan kartaa masraxiyo, shaneemo ama rugta buugagga, halkaaso aad ka heli karto buugag tiro badan oo ay ku qoran yihiin af iswiidish fufud. Dadka kalluumaysiga xiseeyo waxay helayaan goobo badan oo laga kaluumaysto, sida kalluunka [lax] ama [öring]. Waxaa kaloo la heli kara goobo (studieförbund) lagu barto waxyaale tiro badan, sida farsamada gacanta, farsamo iyo luqadaha.

Warbixin faahfaahsan waxaad kala xiriir karta:
Isku dubarideha arrimaha qaxootida
Inga-lill Nordström
Tal: 0934-142 93
Boostada elektroonikada: ilnm@robertsfors.se
Hoyga Internetka: www.robertsfors.se

Ku soo-dhawaada degmada Umeå

Umeå waxaa ku nool ilaa iyo 111 000 oo qof, balse reer Umeå badidooda waxay ku dhasheen meel kale. Da'da dhexe ee dadyowga way hooseeysaa, 37 jir. Umeå waa xuddunta gobolka.

DEGAAN

Way adag tahay sidii guri looga helo Umeå. Baahida guryaha loo qabo ayaa wayn. Si loo daboolo baahida jirta, awoodna loo helo in la qaabilo dadka Umeå ku cusub oo dhan ayaa dhismaha guryaha cusubina la kordhiyey. In ku dhow 7000 oo qof ayaa sannad walba u soo guura Umeå.

ADEEG

Magaalada bartameheeda waxaa ku yaal ilaa iyo 200 dukaan iyo dhowr rug ganacsi. Waxaa intaa u dheer dhowr xaruumo ganacsi, dukaamo gaar ah iyo kuwo xaafadeed . Umeå waxaa xitaa ku yaal Isbitaal-jaamacadeedka Norrland, kaasoo suga daryeelka ugu casrisan ee la heli karo.

XANNAANAD CARRUUR IYO ISKUUL

Carruurta oo dhan waxay fursad u leeyiin xannaanad carruur ama dugsi hoose-dhexe. Haddaad dugsi sare ka dhiganeyso Umeå waxaad heleysaa taqasusyo badan ee aad kala doorato. Markay noqoto taqasusyada dugsiyada sare waxa Umeå ka jira fursadaha ugu ballaaran Iswiidhan. Degmoyinka Umeå, Vännäs iyo Robertsfors oo ay wadashaqeyni ka dhexeyso baa waxa laga helaa 17 manaahij guud iyo dugsi sare gaar ah (oo loogu talogalay carruurta horumarkeedu gaabiso). Taas waxaa u dheer manaahij si gaar ah loo soo qorsheeyey.

WAXBARASHO

Umeå waxaa ku yaal labo jaamacadood. Jaamacadda Umeå waa jaamacad cilmibaaris oo horumarsan oo misna ka kooban toddoba kulliyadood: Kuliyadda Naqshadeynta, Kuliyadda Ganacsiga, Kuliyadda Farshaxanka, Kuliyadda Bay'adda, Kuliyadda Farsamada Gacanta. Kuliyadda Booliska iyo Kuliyadda Isboortiga oo mar dhow la aasaasay. Jaamacadda Beeraha Iswiidhan waa jaamacadda labaad ee Umeå. Taqasusyadeedana waxaa ka mid ah ugaaryahan. Umeå waxaa sidoo kale ka furan Seeraale (Komvux), SFI iyo dhowr isbaheysi waxbarasho.

SHIRKADO IYO SUUQ SHAQO

Umeå waxaa laga furaa shirkado badan oo cusub. Qeybaha ay shirkadahaasu ka shaqeeyaanna waxaa ka mid ah adeeg bulsho, waxbarasho, IT iyo isgaarsiin. Qeybaha iyaguna xooggani waa warshadaha, ganacsiga iyo bulshada.

DHAQAN IYO MAAWEELO

Umeå waxaad ka heleysaa waxyaalo badan oo dhaqan iyo maaweelo ah. Waxaa masalan halkan ka jira urur dhaqameedka ugu wayn Iswiidhan, masraxyo badan, waxyaalo la daawado, muusika, qoobkacayaar iyo waxyaalo kale oo dhallaanka iyo waayeelkaba nolosha u qurxiya. Aqalka heelada Norrland ayaa ku yaal halkan iyo weliba dhoollatusyo caalami ah ee jazz, filim iyo muusika. Umeå waxaad ka heleysaa goobo casri ah ee isboortiga lagu ciyaaro. Waxaa halkan ka jira saddax xaruumood isboorti oo waaweyn masalan Xaruunta Isboortiga IKSU.

GAADIIDKA

Gaadiidka ka baxa iyo midka soo gala Umeå wuu cufan yahay – ha ahaado tareen, baabuur ama diyaarad. Gegada dayuuradaha Umeå waa gegada lixaad ee ugu weyn dalka. Taa waxaa u dheer in gegadu ay u dhowdahay bartamaha Umeå. Basku wuxuu magaalada bartamaheeda uga socdaa 20 mirir, baabuurkuna toban mirir. Marakan waxaa socda qorshe ka mid ah kuwa ugu weyn ee la qorsheeyo si loo wanaajinayo gaadiidka barbar mara xeebta ee gaara Umeå, Botniabanan.

Warbixin faahfaahsan waxaad ka heleysaa
Iskudubaridaha qaxootiga
Inga-Britt Nilsson
Tal: 090-16 10 00 (xaruunta)
E-boosto: viva@umea.se
Bogga Internet: www.umea.se

Ku soo-dhawaada degmada Vindeln

Degmada Vindeln waxaa ku nool dad tiradooda qiyaastii gaareeyso 6 000 qof, wayna ka helaan. Waa degmo u habboon qoysaska carruurta leh iyo keli-nooleyaalka ba. Waa degmo adeeg kastaa aanan ka fogeyn, sida dukaamanda, dugsiyada, rugta daryeelka caafimaadka iwm.

SHAQO IYO GANACSIGA

Degmada Vindeln waxaa ka ganacsado shirkado tiradooda gaareeyso 500. Badidooda waa kuwo yaryar ama dhexdhexaad ah. Laanta ugu weyn waa [tillverkningsindustrin]. Labada shirkad ee ugu waawayn waa [Cranab] iyo [Indexator]. Waa labo shirkad ganacsigooda aad u socdo. Shirkada [Indexator] waxay imminka ku talo jirta in ay dhisato warshad cusub. Degmada Vindeln waxay leedahay guddiga ganacsiga [Vindeln Utveckling], waxay dadweynaha ka caawinaan shirkad dhisida.

WAXBARASHADA

Degmada Vindeln waxaad ku haysata fursad aad ku barato luqada iswiidishka. Waxaa kalo ka heleysaa fursad aad waxbarashadaada sii wadato. Degmada Vindeln waxaa ku yaalo dugsiga [KomVux] [Lär-centrum], [Folkhögskola] iyo [studieförbund].

IS-GAARSIINTA

Is-gaarsiinta baasaska ee degmada way wanaaysan yihiin, maalin kastaa-na maalinta ku xigta ayaa la sii hagaajiyaa gaadidka. Magaalada Umeå wuxuu baaska u socda 55 daqiiqo. Maalin kasta-na waxaa degmada ka dhaqaaqa dhowr baas. Degmada waxaa u dhow dhowr gaaroon, kuwaaso tiradooda ay tahay saddex, Umeå, Lycksele iyo Skellefteå. Waxaa garoomadaas lagu tegi karaa inta u dhaxeeyso 50 daqiiqo – 1,5 sac. Tareenka wuxuu istaaga bartamaha degmada Vindeln. Tareenka wuxuu u dhaqaaqa konfur iyo waqooyi ba.

HOYGA

Waxaa jiro guryaha dabakhada ah, kuwaaso ku yaalan bulshada iyo tulooyinka degmada Vindeln agagaarkeeda ku yaalaan, kuwaaso leh maamulka degmada ama gaar ahaan loo leeyahay.

XANNAANADDA CARRUURTA IYO DUGSIYADA

Waalidiinta way u haboon tahay in ay ka warqabaan, in carruurtooda ay dugsiyada degmada Vindeln ka helayaan magan iyo waxbarasho wanaagsan. Degmada waxaa laga hela kuwa carruurta xannaaneeyo oo kala duwan. Carruurta dhammaantood waxay helayaan fursad ay ku waaran deegaan iyaga u habboon. Waalidiinta waa in maskaxdooda ay had iyo jeer ku haayaan, in carruurtooda ay ku sugan yihiin xaalad badbaadin leh markii ay ku sugan yihiin dugsiyada ama xannaanada. Waa shaqaale xirfad leh oo daacad ah. Carruurtayda waa waxyaalaha noloshayda ugu qaalisan!

DHAQAMADA IYO XILLIYADA FASAXA AH

Bartamaha degmada Vindeln waxaa ku yaalo xarunta wakhti-lummiska [Fritidscentrum]. Waxaa goobtaan laysugu soo aruuriyay dhaqdhaqaaqyada wakhti-lummiska kala duwan, sida [Ishall], [skyttehall], goobta isboortiga iyo goob loogu talaggalay isboorti kala duwan. Carruur iyo dhallinyaro badan ee ku nool degmada Vindeln waxay ciyaaran kubbada cagta iyo [ishockey]. Isla goobtaas waxaa ku yaalo qol ay yaalaan qalabyada muusikada. Degmada Vindeln waxay kaloo leedahay goob lagu dabaasho iyo qol lagu jimicsado. Banaanka degmada Vindeln waxaa ku yaalo dugsiga fardaha. Ururro tiro badan ayaa degmada ka furan, taaso degmada ugu gacan-sareeyso. Kuwaaso ka mid ah kuwa motoorada, isboortiga ilaa masraxiya iyo kuwa fanka. Haddiise aysan jirin urur qofku u ka helo, hab fudud ayaa loo asaasi karaa!

ADEEGGA BULSHADA

Degmada Vindeln waxaad ka heleysaa wax kasto. Waxaa ku yaalaaan dukaammo lagu iibiyo raashinka, dharka, iyo kabaha. Degmada Vindeln waxaa kaloo ku yaalo dukaan lagu iibiyo qalabka birta, rinjiga, elektroonikada iyo qalabyada jikada. Waxaa kaloo laga hela rugta daryeelka caafimaadka iyo kan ilkaha ba oo casri ah.

Warbixin faahfaahsan waxaad kala xiriir karta:
Isku dubarideha arrimaha qaxootida
Ulrika Gustafsson
Tal: 0933-140 52, 070-309 60 89
Boostada elektroonikada: ulrika.gustafsson@vindeln.se
Hoyga Internetka: www.vindeln.se

Ku soo-dhawaada degmada Vännäs

Vännäs oo ah meel ay madaddaalo ka dhawdahay waxay ku taal bartamaha gobolka Umeå waxaana ku nool 8500 oo qof. Halkaani tayada nolosha waa u wada muhiim dadka waaweyn iyo kuwa yaryarba! Waynu ku dadaalnaa inaynu caawinno qof allaaleh iyo qofka halkan raba inuu soo dego iyo kan doonayaa inuu shirkad ka furtaba. Vännäs waxay kugu soo dhaweynaysaa wadajirka diiran ee lagu yaqaan beelaha yar iyo farsamada iyo adeegga hufan ee ay beelaha weyni ku caanka yihiin.

DEGAAN

Vännäs waxaad ka heli kartaa degaan kugu habboon ha ahaado guri dabaq ah qeybtii ama mid isku dhan oo kuu gaar ah, magaalo ama mid ka mid ah tuulooyinkeena.

ADEEG

Vännäs waxay kugu soo dhaweynaysaa dukaamo farobadan. Halkaani waxaad meel aad socod ku gaarto ka heleysaa wax kasta laga billaabo alaab-dhaqameed iyo farshaxan ilaa iyo alaabo qadiin ah iyo kuwa ugu casrisanba. Halkan waxaa ku yaal dukaamo lagu iibiyo alaabo nololmaalmeed, maqaayado, bangiyo, farmashiye, rug caafimaad, takhtar ilko iyo maktab. Vännäs waxay leedahay xaruun qoys oo ay ku yaaliin rug umuliso, rug caafimaad carruur, talobixin qoys, rug dhalinyaro, xannaanad furan iyo xaafiis adeeg bulsho.

SHAQO IYO GANACSI

Vännäs waxay leedahay shirkado farobadan. Qaarka ugu badan waxay ku taxluqaan gaadiidka. Balse waxaa sidoo kale halkaan ka jira warshado, shirkado ganacsi iyo kuwo adeeg. Vännäs waa meesha ay shaqola'aantu Västerbotten ugu yar tahay, taas oo keentay in baahi weyn loo qabo shaqaale aqoon leh. Degmada qeybaheeda adeegga bulsho (daryeel caafimaad, iskuul iyo xannaano) mar walba shaqaale ayay u baahan tahay. Adeegga Shirkadaha ee Vännäs waxay aad ugu wanaagsan yihiin caawimada dadka doonaya inay furtaan shirkado u gaar ah waxayna sidoo kale gacan ka geystaan horumarinta shirkadaha meesha ka furan.

XANNANAAD CARRUUR IYO ISKUUL

Vännäs waxay leedahay dugsiyo hoose-dhexe oo badan ee ku kala firiirsan degmada oo dhan-magaalooyinka iyo tuulooyinkaba. Waxaynu leenahay iskuul gaar ah (oo loogu talogalay carruurta horumarkeedu gaabiso) oo ku dhex dhafan xannaanad carruur, dugsi hoose-dhexe ilaa iyo dugsi sare. Waxaynu leenahay goobo ardadu ay ku qaadato waqtigeeda firaaqda ah iyo kuwo lagu hayo carruurta da'da yar ee ka kooban rugo xannaano caruureed iyo daryeelayaal gaar ah ee ku haya guryahooda carruurta. Vännäs waxaa ku yaal Liljaskolan oo ah mid ka mid ah dugsiyada sare ee ugu waaweyn gobolka Umeå halkaasoo ay dhigtaan ilaa iyo 1 000 arday. Ardada badankeed waxay ka timaadaa gobolka Umeå balse waxa kale oo halkaas wax ka dhigta arday ka kala timaadda ilaa iyo 80 degmo oo kale oo Iswiidhish ah iyo arday ka socota waddamada waqooyi ee aan deriska nahay.

WAXBARASHADA DADKA WAAWEYN

Vännäs waxaad SFI iyo Seeraale (Komvux) ka dhigan kartaa Liljaskolan. Halkani waxa sidoo kale laga baran karaa xirfado kala duwan sida gaariwade, tareenwade, macalin gaariwade, daryeele caafimaad, qorsheeye iwm. Dhawaanta Umeå iyo gaadiidka wanaagsan waxay sahlayaan waxbarasho jaamacadeed. Degmada waxa sidoo kale ku yaal isbaheysiyo badan ee waxbarasho oo laga dhigan karo casharro kala duwan oo ay ka mid yihiin luuqado, cilmi bulsho, dhaqan iyo maaweelo.

DHAQAN IYO MAAWEELO

Vännäs waxaa ka furan ilaa iyo 160 urur oo ku taxluuqa dhaqanka iyo maaweelada. Waxaad ururadaas ka heleysaa waxaad qabato waqtiyada aad firaaqada tahay laga billaabo ciyaaro iyo jimicsi ilaa iyo dhaqanbarasho. Vännäs waxa ku yaal shineemo, maktab, goobo kala duwan oo ciyaareed iyo kuwa waqtiga la isku dhaafiyo sida fardofuul, kubad-cag, ciyaaro baraf, tartan gaadiid, xabbado-rid, dabaal-dibadeed kulul, kalluumeysi, mijobaxsi iyo waxyaalo kale oo badan.

GAADIID

Vännäs waa degmo safar taasoo ay micnaheedu tahay inuu jiro gaadiid wanaagsan ee loo raaco degmooyinka nagu wareegsan. Maalmaha shaqada waxaa jira in ku dhow 30-meeyo basas ee loo kala raaco Vännäs–Umeå. Halkii safar wuxuu qaadanayaa ilaa iyo 30 daqiido. Vännäs waa meel caan ku ah waddooyinka xaddiidka kuwaas oo loogu kala gudbo waqooyi iyo koofurba. Taa waxaa u dheer in dhawaanta Umeå ay ina siiso fursad aan ku adeegsano garoonkeeda dayuuradeed. Labada jid ee waaweyn oo dhex mara degmada waxay sahlaan gaadiidka isaga gudba bari-galbeed iyo waqooyi-koofur.

Warbixin faahfaahsan waxaad ka heleysaa
Iskudubaridaha qaxootiga
Ingrid Lindroth
Tal: 0935-145 85
E-boosto: ingrid.lindroth@educ.vannas.se
Bogga Internet: www.vannas.se

Suuqa shaqada ee gobolka Umeå

Xirfadaha soo socda ayaa loo arkaa in mustaqbalka shaqaale badan looga baahdo.

DARYEEL CAAFIMAAD
Takhtar
Kalkaalisooyin caafimaad taqasus gaar ah leh
Kalkaaliyeyaal shakhsi (in la kalkaaliyo qof curyaan ah)
Kalkaaliso darajo hoose (degmooyinka qaarkood)
Baare Biomedisin

MACALINNIMO
Macalin dugsi sare/macalin xirfad (baabuur/dhismo/rinji)
Macalin af masalan isbaanish/jarmal
Macalin wax bara ardada waxbarashadu ku adag tahay
Macalin muusiko

WARSHADAHA WAXSOOSAARKA
Maamule CNC
Alxanle tuubooyin
Farsamoyaqaan qalab
Injeneer guud/ injeneer farsamo
Rakibaad
Makiinad
Elektronik
Farsamoyaqaan koronto

IT/KOMBAYUUTAR
Istraatijibixiye IT ee aqoon sare leh
Habeeye/barnaamij-qore (heer injeneer Kombayuutar)

FARSAMADA BAABUURTA
Farsamoyaqaan baabuur aqoon sare leh
Farsamoyaqaan baabuurta xamuulka
Farsamoyaqaan matoor (sida matoorada dallacaadda, dallacaadda lugaha, cagafcagaf)

DHISMO
Nijaar waayoarag ah
Shamiitaale waayoarag ah
Dhagaxdhige waayoarag ah
Dhulgelinta dhuumaha (shaqo-xilli)
Tuubiiste – rakibaad/hagaajin
Farsamoyaqaan qaboojiye – rakibaad/gacankuhayn qaboojiye guri
Korontoyaqaan waayoarag ah – rakibaad iyo warshado
Jiingadeeye waayoaragnimo leh
Mashiinwade dhismo, masalan mashiin dhulka qoda
Hoggaamiye tuubiste, koronto iyo dhismo
Injeneer/talobixiye tuubiiste, koronto iyo dhismo
Naqshadeeye/qorsheeye guri

GAADIID
Darawal baabuur xamuul (masalan ADR, baabuur batrool)
Darawal mashiin baqaar (shahaado) – kala meeleynta alaabta
Darawal mashiin duureed (degmooyinka qaarkood)

MAQAAYAD
Cuntokariyeyaal aqoon iyo waayoaragnimo leh
Adeege waayoarag ah

Waxyaalaha laga fakaro marka shaqo la raadsado

- Shahaado waxbarasho (muhiim in la muujiyaa aqoon gaar ah)
- Caddayn shaqo hore looga shaqayn jiray
- Aqoonsi xirfad (masalan takhtar, kalkaaliso caafimaad)
- Garashada afka iswiidhishka
- Hawlkarnimo qofka u gaar ah
- Muuji rabitaanka iyo xiisaha aad u qabtid shaqada/shirkadda

PHOTO: CALLE BREDBERG, BRITT GUSTAFSSON, VÄNNÄS BILD, LARS KLEFBOHM, BERNT LIDSTRÖM, MIKAEL LUNDGREN, UMEÅ KOMMUNS BILDBANK, VINDELN UTVECKLINGS BILDARKIV.

FAAFIN LOO MADAX BANNAAN YAHAY
– WARBIXIN LOOGU TALOGALAY MAGANGELYODOONKA

Warbixin faahfaahsan ee ku saabsan qorshaha waxaa laga helayaa:
Åsa Kling, 090-16 41 23, 070-256 69 08, asa.kling@umea.se

Warbixin faahfaahsan ee ku saabsan suuqa shaqada waxaa laga helayaa:
Håkan Forsell, 010-486 31 01, 070-342 75 88
hakan.forssell@arbetsformedlingen.se

Qorshaha waxaa maalgeliyey degmooyinka gobolka Umeå, Qasnadda qaxootiga Yurub,
Xaafiiska shaqada iyo Hay'adda socdaalka.

Umeå REGIONEN Migrationsverket Arbetsförmedlingen

VIVA Kompetenscentrum 2008. Grafisk form: Plakat. Tryck: PMC